

Tillaabooyinki lagu soo rogay Nordre Follo iyo Halden markii uu cudurku ka dillaacay halkoodii ayaa laga sii wadayaa, marka in aan badnayn laga reebo

Xaaladda is-qaadsiinta cudurku ma kala cadda, waxaana had iyo jeer soo baxaya noocyoo cusub ee fayraska noociisa la is-qaadsiin og yahay ah. Sidaas darteed ayaa intooda badan loo sii wadayaa tillaabooyinkii lagu xaddidayay faafidda is-qaadsiinta cudurka ka dillaacay Nordre Follo iyo Halden. Nordre Follo iyo Ås waxaa laga soo wareejinayaa wareegga 1-aad waxaana loo wareejinayaa wareegga 2-aad, tillaabooyinkiina qaar ayaa laga dhaafayaa. Enebakk, Frogner, Nesodden iyo Vestby waa laga daynayaa tillaabooyinka sida gaarka ah loo adkeeyay ee dalka.

- Xaaladda is-qaadsiinta cudurku ma kala cadda si degdeg ah ayayna isu beddelaysaa. Wuxaana had iyo jeer soo baxaya noocyoo cusub oo fayraska noociisa la is-qaadsiin og yahay ah, qaar badan oo ka mid ah dadka cudurka laga helayna lama oga meesha ay ka qaadeen. Sidaas darteed ayaa tillaabooyinka intooda badan loo sii wadayaa, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

Oslo iyo nawaaxigeeda waa meel ay gudaheeda dadku aad isaga dhex socdaan sida shaqada, carruurta iyo dhallinyarada aada dugsiyada iyo firfircoonda la qabto wakhtiga firaaqada la yahay iyo gaadiidka dadweynaha oo aad loo raaco. Kuwaan ayaa kordhiya khatarta is-qaadsiinta cudurka.

Waa la fududayanaa tillaabooyinkii Nordre Follo iyo Ås

Nordre Follo iyo Ås si fiican ayay hadda gacanta ugu dhigeen xaaladda is-qaadsiinta cudurka, waxaana sidaas darteed laga wareejinayaa wareegga 1-aad ayada oo loo wareejinayo wareegga 2-aad.

- Taas oo micnaheedu yahay Nordre Follo iyo Ås in ay laga billaabo 11-ka febraayo goobaha jimicsiga u furi karaan dadka degmada deggan. Mana aha mamnuuc in qabanqaabooyin la qabto, ayuu yiri Høie.

Dhammaan degmooyinka ay arrintu khusayso waxay 8-dii febraayo ka qaybqaateen kulankii dhex maray madaxa maammulka gobolka Oslo iyo Viken, Hey'adda caafimaadka dadweynaha iyo Agaasinka caafimaadka – ayaga oo fikraddooda ka dhiibtay heerka tillaabooyinka ee ay degmooyinkoodu doonayaan.

Xeerarkani waxay soconayaan laga billaabo 11-ka febraayo ilaa iyo 17-ka febraayo 2021:

Wareegga 1-aad (oo ku jira tillaabada heerka C: Waa tillabo heerkeedu ilaa xad sarreeyo)

Oslo, Halden, Sarpsborg.

Oslo muddo dheer ayuu ka jiray cadaadis is-qaadsiin cudur oo badan, waxayna sii ahaanaysaa heerka tillaboooyinka C. Halden iyo Sarpsborg ayaguna heerkaan tillaboooyinka ayay ku sii jirayaan – maaddaama uu cudurku dhowaan Halden ka dillaacay oo aysan xaaladda is-qaadsiintu weli kala caddayn.

Wareegga 2-aad (oo ku jira tillaabada heeraka D: Waa tillabo heerkeedu yara sarreeyo)

Nordre Follo, Ås, Asker, Bærum, Indre Østfold, Hvaler, Fredrikstad, Moss, Rakkestad, Råde, Skiptvet, Våler, Lillestrøm, Lunner, Lørenskog, Rælingen, Nittedal.

Waxaa loo arkaa in xaaladda is-qaadsiinta cudurka ee Nordre Follo og Ås in ilaa iyo xad gacanta lagu dhigay. Wixaana sidaas darteed degmooyinkaan laga wareejinayaa wareegga 1-aad ayada oo loo wareejinayo wareegga 2-aad.

Degmooyinka soo socda kuma jiraan nidaamkii tillaboooyinka sida gaarka ah loo adkeeyay ee dalka:

Enebakk, Nesodden, Frogner, Vestby.

Degmooyin ku xeeran ayuu muddo dheer cadaadiska is-qaadsiinta ee halkaas ka jira ahaa mid aan badnayn, waxayna isu arkaan in ay si fiican u raadraaci karaan cudurka ayaga oo si fiican u dabakhi kara tillaboooyinka looga hortagato is-qaadsiinta cudurka. Sidaas darteed ayaa degmooyinkaan laga saarayaa kuwii lagu soo rogay xeer-hoosaadka, haddii ay u baahdaanna ayaga ayaa degaankooda ku soo rogi kara go'aammo cudurka lagu xaddidayo.

Warbixin kale oo ku saabsan wareegga 1-aad iyo wareegga 2-aad

Dawladda ayaa go'aamin karta tillaboooyinka laga hirgeliyayo degmo iyo degmooyinka ku xeeran marka loo baahan yahay in tillaboooyin si degdeg ah loo hirgeliyo laysuguna dubarido si looga hortago is-qaadsiinta cudurka.

"Degmooyinka wareegga 1-aad" waa degmooyinka uu cudurku ka dillaacay iyo degmooyinka dillaaca xiriirkka la leh ama kuwa xiriirkka badan la leh degmooyinka uu cudurku ka dillaacay.

"Degmooyinka wareegga 2-aad" waa degmooyinka ku xeeran "Degmooyinka wareegga 1-aad" oo ayaga laftigoodu dillaaca dartiis u baahan in ay si degdeg ah tillaboooyin u hirgeliyaan.

Wareegga 1-aad iyo wareegga 2-aad waa keliya magacyo joqraafi ah. Heerka tillaboooyinka lagu soo rogayo wareegga 1-aad iyo wareegga 2-aad waxay ku xiran tahay hadba inta ay le'eg tahay khatarta cudurka dillaacay. Waxaa jira afar heer oo tillaboooyin la isticmaali karo ah. Kuwaas oo kala ah A (tillaabo heerkeedu aad u sarreeyo), B (tillaabo

heerkeedu sarreeyo), C (tilaaboo heerkeedo ilaa xad sarreeyo) iyo D (tilaaboo heerkeedu yara sarreeyo).